

u socota

Qofka dhigta waxbarashada dadka waaweyn ee ay degmooyinku bixiyaan ee loogu talogalay dadka ajaanibka

## Imtixaanka kama dambaysta qaranka (sfi)

Waa ku salaamaynaa!

Waxaad adigu dhawaan bilaabaysaa inaad samayso mid ka mid ah imtixaanada kama dambaysta ee waxbarashada dadka waaweyn ee ay bixiyaan degmooyinka wadanku kuwaas oo loogu talogalay dadka ajaanibka (sfi). Ujeedada laga leeyahay imtixaanka waa sidii macalimiinta loo caawinlahaa sidii ay u qiimayn lahaayeen iyo sidii aad adigu ugu guulaysan lahayd oo aad u gaadhilayd qeybaha markaas aad dhigato ee shuruudaha darajooyinka ee qorshaha kooraska. Imtixaanku wuxuu kaloo qayb ka qaadanayaa sidii loo qiimayn lahaa sidii ay aqoonta ardaydu isku mid u noqon lahayd.

Muqararka waxbarashada dadka waaweyn ee degmooyinka wadanka iswiidhan ay bixiyaan aaya aasaas u ah imtixaanada koorsooyinka dadka ajaanibka loogu talogalay, markay noqoto qaabka loo habaynayo shaqooyinka waxbarasho ee laqabanayo iyo sidii shaqooyinkii la soo qabtay loo qii-maynlahaa. Waa muhiim inuu arday kastaaba sida ugu macquulsan ku helo fursad uu ku muujiyo aqoontiisa. Hal imtixaan oo keliya laguma oggaankaro wax walba. Natijadada ka soo baxda imtixaanka qaranka waxay ka mid noqonaysaa qayb ka mid ah qiimaynta taas oo saldhig u no-qonaysa shahaada koorsooyinkaaga. Imtixaanka kama dambaysta ee qaranka oo dhan laga qaadayaa qayb muhiima ayay ka noqodoontaa marka shahaadada la bixindoono, laakiin macalinku wuxuu samayndoonaan qiimayn guud oo ku saabsan aqoonta aad adigu leedahy.

### Sidee ayuu imtixaanka (sfi)-gu u eg yahay?

Waxyabaha muhiimka ah ee su'aalaha imtixaanka waxa ka mida inuu qofku akhrinkaro oo uu qoraalo qorana fahmikaro, inuu ku hadalkikaro, hadalkana fahmikaro oo uu qoraalna ku samaynakro waxyaabo nolol maalmeedka la xririira, shaqada iyo nolosha bulshadaba.

Imtixaanka waxa loogu talogalay in afar saacadood lagu fuliyo.

Imtixaanku waxa loo kala qaybiyey qaybo kala duwan:

- Qaybta fahamka akhriska waxay u qaybsan tahay laba qaybood. Su'aalaha laga shaqaynayaa waxey ku dhisan yihiin oo ay isugu jiraan su'aalo kooban iyo qaar dhaareer.
- Qaybta su'aalaha tijaabada ee fahamka dheysiga waxay u qaybsan yihiin qayb kooraska C iyo D, iyo laba qaybood oo ah kooraska B. su'aaluuhu waxay ku salaysan yihiin dad la waraysta oo interfiyuu laga qaaday oo codkooda la duubay, wadahadal ama warka.
- Qaybta su'aalaha tijaabada ee ku saabsan sida uu qofka xariif ugu yahay qoraalka waxay ka kooban tahay su'aalo qoraala ee qaybta B iyo C, iyo su'aalo qoraala oo ka kooban kooraska D.
- Qaybta su'aalaha tijaabda ee ku hadalka afka waxay ka kooban tahay su'aalo gaara oo ku jira kooraska B, iyo su'aalo gaara iyo qaar kale oo ku jira koorasyada C iyo D.

Bogga kale sii akhriso

Waxaad adigu warbixin ka helidoontaa macalinkaaga sida imtixaanka loo qaadayo, sida aad imtixaanka u samaynaysid iyo sida loo qiimaynayaba. Imtixaanka waxa lagu salaynaya marka shahaadada la bixinayo heerka shahaadooyinka ee Baasitaan (G) ama aan ku basin (IG).

### Cidda mas'uulka ka ah imtixaanka

Wasaarada waxbarashadda ayaa ka mas'uula imtixaanada qaranka oo dhan. Imtixaanka waxa lagu soo saaraa laguna horumariyaa machadka barashada waxbaridda ee jaamacada Stockholm iyagoo la shaqaynaya Hey'adda sare ee waxbarashadda (Skolverket).

Su'aalaha imtixaanka waxa lagu tijaabiyyey dugsiyo badan oo ku yaala wadanka gudihiisa. Dadka imtixaanka ka qayb qaadabaya, macalimiinta iyo dadka cilmibaadhayaashuba waxay soo jeediyeen fikrido ku saabsan imtixaananda.

Waxaanu rajaynaynaa inaad u aragto inuu imtixaanku fiican yahay isla markaana aad ka hesho fursad aad ku muujiso aqoontaada.

### Halkee laga helayaa warbixin dheeraad ah?

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan imtixaannada ka dambeysta ee heer qaran waxaa laga helayaa bogga internetka ee Hey'adda sare ee waxbarashadda.

[www.skolverket.se/np](http://www.skolverket.se/np)

Halkaas waxaa kale oo laga helayaa tusaalin ku saabsan sida ey u egiihiin su'aalaha imtixaannada kama dambeysta ah ee heer qaran.

### La xiriir Hey'adda sare ee waxbarashadda

[nationellaprov@skolverket.se](mailto:nationellaprov@skolverket.se)